

Fentanyl ta Sanka laga Neefsado

Fentanyl ta sanka la qaado waa daawo degdeg ah, oo waxtar u leh xanuunka. Waxaa lagu qaataa in daawada sanka lagaaga buufiyo. Waa dookh wanaagsan marka aanaan wali heli karin IV.

Waxaan ognahay qiimaha uu qorshaha xanuunku uu u leeyahay qof kasta. Waxaan qorsheynaynaa inaan u guurno daawada xanuunka ee IV da (opioid) taasoo sida ugu haboon u shaqeysa marka lagugu siiyo xididka IV. Talaabada ugu muhiimsan maaraynta dhibaataada xanuunku waa in la daweeyo xanuunka xili hore. Daawadaan ayaa naga caawinaysa inaan xili hore biloowno daawaynta xanuunkaaga si aan iskaga ilaalino inaan hadhoow daba orodno. Tan ayaa la ogaaday inay yareeyso baahida loo qabo in isbitaal lagu seexsho.

Daawada fentanyl ee sanka laga qaato waa daawo aad caan u ah oo aan u adeegsano daawaynta dhammaan noocyada xanuunka, sida, lafaha jajaba, gubashada, iyo dhaawacyada kale. Waxaa lagu talinayaa in loo adeegsado heerka qaran ee xanuun baabi'iyaha degdega ah ee dhibaataada xanuunka.

Waa daawo oo leh jawaab degdeg ah oo ay fudud-dahay in la adeegsado. Waxaan u samayn karnaa kuurada baahiyaha qof kasta. Waxaa lagu arkaa jawabateeda dhawr daqiiqo gudahood. Da'da cunugaaga iyo miisaanka ayaa loo adeegsadaa go'aaminta kuurada badqabka iyo waxtarka leh.

Si lamid ah daawooyinka kale xanuunka ee Opioid-ka, fentanyl ayaa sababi karta cilado kuwaasoo caadiyan ku meel gaar ah wayna dhammaanayaan. Kuwaan ku jira:

- sarqaan
- dawakhaad
- lalabada

Daawada fentanyl ee sanka ayaan lahayn xanuun. Nus kamid ah kuurada ayaa galaysa hal duleel sanka ah halka nuska kale galaayo duleelka kale ee sanka. Waxa keliya ee aad u baahan tahay inaad samayso waa inaad isdejiso aadna si caadi ah u neefsato.

Yoolkeenu waa inaan ku siino daryeelka ugu wanaagsan ee suuragalka ah anagoo kaa caawinayna in la dejiyo xanuunkaaga xili hore.

Tixraacyada

American College of Emergency Physicians (2023, Juun 22). Maareynta xanuunka sickle cell.

<https://www.acep.org/patient-care/sickle-cell/>

Brandow, A.M., Carroll, C.P., Creary, S., Edwards-Elliott, R., Glassberg, J., Hurley, R.W., Kutlar, A., Seisa, M., Stinson, J., Strouse, J.J., Yusuf, F., Zempsky, W., & Lange, E. (2020).

Tilmaamaha American Society of Hematology 2020 ee xanuunka sickle cell: Maareynta xanuunka degdeg ah iyo kan dabo dheeraada. Blood Advances, 4(12), 2656-2701.

<https://doi.org/10.1182/bloodadvances.2020001851>

Kavanaugh, P.L., Sprinz, P.G., Wolfgang, T.L., Killius, K., Champigny, M., Sobota, A., Dorfman, D., Barry, K., Miner, R., & Moses, J.M. (2015). Kor u qaadista maareynta nabarada

xanuunka ee waaxda xaalada degdega ah ee caafimaadka carruurta. Pediatrics, 136(4), e1016-e1025. <https://doi.org/10.1542/peds.2014-3470>

Puri, L., Nottage, K.A., Hankins, J.S., & Anghelescu, D.L. (2018). Qalabka casriga ah ee maareynta xanuunka daran ee cudurka sickle cell. Pediatric Drugs, 20, 29-42.

<https://doi.org/10.1007/s40272-017-0263-z>

Rees, C.A., Brousseau, D.C., Ahmad, F.A., Bennett, J., Bhatt, S., Bogie, A., Brown, K.M., Casper, T.C., Chapman, L.L., Chumpitazi, C.E., Cohen, D.M., Dampier, C., Ellison, A.M., Grasemann, H., Hatabah, D., Hickey, R.W., Hsu, L.L., Bakshi, N., Leibovich, S., ...Morris, C.R. (2023). Daawada fentanyl ee sanko laga qaato iyo ka saarida waaxda xaalada

degdega ah ee carruurta qaba xanuunka iyo nabarka qandhada daran: Fikirka Caafimaadka xaalada degdega ah ee carruurta ee xarumaha badan. American Journal of Hematology, 98(4), 620-627. <https://doi.org/10.1002/ajh.26837>